Westerville City Schools

936 Eastwind Drive, Westerville, OH 43081
Main Office (614)797-5700, Fax (614)797-5701

Waalidka/Mas'uulka Qaaliga ahoow,

Sida ay muujinayaan diiwaanadayada caafimaadka, ardaygaaga waxaa taariikhda ugu jira inuu qabo Xasaasiyad Daran. Haddii ilmahaagu u baahan yahay inuu heli karo daawada xasaasiyadda inta uu dugsiga ku jiro, fadlan buuxi kuwan soo socda:

1. Qorshaha Waxqabadka Xasaasiyadda (waxaa lagu beddeli karaa foomka bixiyaha caafimaadka haddii dhammaan macluumaadka lagu daro) - Waa inay buuxiyaan oo ay saxiixaan bixiye caafimaad IYO waalidka/masuulka.

2. In Ardayga loo ogolaado inuu Haysto oo Isticmaalo dawada xasaasiyadda ee tooska la iskaga duro (Epinephrine Auto-Injector) - Haddii aad jeclaan lahayd in ardaygaagu uu qaato daawada toos-isku-duro ee epinephrine inta lagu jiro saacadaha dugsiga, waa in bixiyaha caafimaadka iyo waalidku ay foomka soo buuxiyaan oo saxiixaan. Fadlan ogow: Haddii aad doorato ikhtiyaarka in ilmahaaga iskii uu qaato daawada, waa inaad Cirbadda Toos-Isku-Durida ee Epinephrine oo dheeraad ah aad keentaa si loogu hayo Rugta Cafimaadka ee iskuulka.

3. Codsiga In la Siiyo Ardayga Dawo Qoran Inta Lagu Jiro Saacadaha Dugsiga - Dhammaan daawoyinka rijeeto la'aanta laga gato rugta caafimaadka waa in ay haystaan oo galka uu ku jiro amarka bixiyaha oo saxiixan. Haddii uu ilmahaagu u baahan yahay dawo marka laga reebo Epinephrine, sida antihistamine (ie. Benadryl, Zyrtec), fadlan dhakhtarkaaga ka codso inuu foomkan buuxiyo oo saxiixo. Waalidka/masuulku waa inuu sidoo kale foomkan saxiixaa.

4. Foomka Wax ka beddelka Cuntada Kafateeriyada - Haddii ilmahaagu u baahan doono cunto gaar ah sida beddelka cuntada ee kafateeriyada, fadlan weydiiso dhakhtarkaaga inuu buuxiyo oo saxiixo foomkan. Waalidka/masuulku waa inuu sidoo kale foomkan saxiixaa. Haddii aad jeclaan lahayd nuqul ka mid ah Hagaha agabyada Dugsiyada Magaalada Westerville ee Kaalmaynta Carruurta qaba Xasaasiyadda Nafta Halista galisa, fadlan u sheeg kalkaalisada dugsigaaga. Waxa kale oo laga heli karaa mareegaha degmada dugsiga qaybta hoos timaada Adeegyada Caafimaadka.

Fadlan wixii su'aalo ama walaac aad qabto la xiriir rugta caafimaadka ee dugsiga.
Si daacadnimo leh,

Kalkaalisoonyinka Degmo Dugsiyeedka Magaalada Westerville

Qorshaha Waxqabadka Xasaasiyada ee Degmo Dugsiyeedka Magaalada Westerville

Miisaanka: _____ rodol Neef: Haa (khatarta sare ee falcelinta daran) Maya

MID UN KA MID AH KUWAN HOOSE:

SAMBABKA: Neefta oo yaraata, hiinraag, qufac soo noqnoqda

WADNAHA: Maqaarka oo guduuto ama buluug ah, daal, garaaca wadnaha oo daciif ah, dawakhaad

CALOOSHA: Matag soo noqnoqda, shuban daran

DHUUNTA: Cunaha oo ciriiri noqdo ama xabeeb leh, neefsashada ama liqidda oo dhib noqota

WAX KALE: Dareenka wax xun inay dhici doonaan, walaac, jahawareer

AFKA: ISKU-DARKA calaamadaha ka yimaada meelo kala duwan oo jirka ah.

2. Wac telefoonka 911. U sheeg soo diraha gurmadka in qofka uu qabo falcelin xasaasiyadeed-daran oo laga yaabo inuu u baahdo epinephrine marka ay gurmadka degdega ahi yimaadaan.
• Tixgeli ama iskuday inaad siiso daawooyin dheeri ah kadib epinephrine:
» Neefsiiyeyaasha (bronchodilator) hadduu hiinraag jiro

• Qofka si fidsan ujiifi, lugaha kor u qaad oo diirri. Haddii ay neefsashadu ku adag tahay ama ay matagayaan, fadhiisi ama dhinac u jiifi.

• Haddii calaamaduhu aysan soo roonaan, ama calaamaduhu soo noqdaan, qiyaas/dawo dheeraad ah oo epinephrine ah ayaa la siin karaa qiyaastii 5 daqiiqo ama ka badan ka dib marka laga joogo dawadii ugu dambeysay ee la siiyay.

• Ogaysii dadka xiriirka deg dega ah kujira.

• Bukaanka u qaad Qolka Degdegga (ER), xitaa haddii ay calaamaduhu soo roonaadaan. Bukaanku waa inuu Qolka Degdegga (ER) ku jiraa ugu yaraan 4 saacadood maadaama calaamaduhu soo noqon karaan.

BUKAANKA AMA WAALIDKA/MAS'UULKA AH
SAXIIXA OGGOLAANSAHA _____ TAARIIKHDA_____

OGGOLAANSHAHA DHAKHTARKA/HCP
SAXIIXA _____ TAARIIKHDA _____

Waaxda Caafimaadka Ohio

Oggolaanshaha Ardayga ee Haysashada iyo Isticmaalka dawada xasaasiyadda ee Tooska la Iskugu Duro (Epinephrine Auto-Injector)

Sida waafaqsan ORC 3313.718/3313.141

Qaybtan waa in uu buuxiyaa oo uu saxiixaa waalidka ama masuulka ardayga.

Anigoo ah Waalidka/Mas'uulka ardaygan, waxaan ilmahayga u fasaxayaa inuu dawada epinephrine autoinjector sida loogu soo qoray uu ku haysto oo ku isticmaalo, dugsiga iyo hawl-qabadyada dugsiga, munaasabada, ama barnaamij kasta oo uu dugsigu qabanayo ama uu dugsiga ardaygu uu ka qayb galayo. Waxaan fahamsanahay in shaqaalaha dugsigu uu isla markaaba caawinaad ka codsan doono bixiyaha adeegga caafimaadka degdegga ah haddii daawadaan la siinayo. Waxaan maamulaha dugsiga ama kalkaalisada u dhiibi doonaa daawada kayd ah sida uu sharcigu qabo.

Saxiixa Waalidka/Masuulka	Taariikhda
Magaca Waalidka/Masuulka	Lambarka taleefanka degdegga ah ee Waalidka/Masuulka ( )

Magaca iyo qiyaasta daawada	
Taariikhda isticmaalka daawadu bilaabmayso	Taariikhda isticmaalka daawadu ay dhammaanayso (haddii la garanayo)

Fal-celin xasaasiyadeedka aadka udaran ee suurtagalka ah:

La siiyo ardayga dawada loo qoray (oo ah in lagu wargeliyaa cidda u qortay)
La siinayo ardayda ***aan dawada loo*** qorin

Tilmaamaha gaarka ah

Saxiixa cidda u qortay	Taariikhda
Magaca cidda u qortay	Taleefanka degdegga ee cidda u qortay ( )

Waxaa la sameeyay iyadoo lala kaashanayo Ururka Kalkaaliyeyaasha Dugsiga ee Ohio.

DUGSIYADA MAGAALADA WESTERVILLE

CODSIGA IN ARDAYGA LA SIIYO DAAWADA LOO QORAY SAACADAHA DUGSIGA LAGU GUDA JIRO
Sida Uu Farayo Qaybta 3313.713 ee Xeerka Dib Loo Eegay

Cinwaanka Guriga Ardayga: _____

QEYBTA WAALIDKA

1. Foomkan waa in waalidka (qaybta sare) iyo cidda qortay daawada (qaybta hoose) ay labaduba buuxiyaan
2. Daawada waa in lagu hayaa dhalada **daawada lagu calaamadayeeyay ee ardayga**. (Waxaa dhici karta in farmashiyuhu bixiyo dhallo dheeraad ah loona isticmaalo daawada la isticmaalayo muddada dheer.) Calaamadaynta daawadu waa in ay waafaqdaa tilmaamaha dhakhtarka dawada qoray. Haddii ay tahay daawo aan la soo qorin, waa in ay ku jirto weelka asalka ahaa.
3. Waa in waalidka/masuulka ama qof kale oo weyn oo mas'uul ah oo waalidku ka codsadey uu shaqaalaha rugta caafimaadka ee dugsiga uu toos ugu geeyaa kayd daawo la isticmaalo wax aan ka badnayn 2-4 toddobaad. Tani waa in horay loo habeeyo.
4. Hadii wax isbedel ah uu jiro waa in qoraal saxiixan dhakhtarka laga keeno. Foom cusub ayaa loo baahan yahay sannad dugsiyeed kasta.

Marka ay suurtogal tahay, sii daawada wakhti ka baxsan saacadaha dugsiga. *OGGOLAANSHAHA: Aniga, waxaan u fasaxay Shaqaalaha Dugsiga inay si toos ah ula xiriiraan dhakhtarka haddii ay dhacdo fal-celin xasaasiyadeed oo darran oo degdeg ah sida hoos ku xusan. Oggolaanshahani ma beddelayo mana tirtirayo "Foomka Caafimaadka Degdegga ah".

Saxiixa Waalidka: _____ Taariikhda: _____
Saxiixa waalidku waxa uu u fasaxayaa shaqaalaha dugsiga in ay daawada hoos ku qoran siiyaan.

Lambarka taleefanka waalidka: _____ _____
Wakhtiga maalintii Fiidkii

QEYBTA DHAKHTARKA

Waxaan xaqiijinayaa in daawadan ay tahay in uu qaato: _____
Magaca Ardayga

DAAWOOYINKA MAALINLAHA AH (Marka ay suurtogal tahay, fadlan isku day inaad jadwal usamayso dawada ka baxsan saacadaha dugsiga)

DAAWADA	QIYAASTA	SIDA LOO SIINAYO	WAKHTIGA LA SIINAYO

DAAWOOYINKA LOO ISTICMAALO HADBA SIDA LOOGU BAAHDO

DAAWADA	QIYAASTA	SIDA LOO SIINAYO	WAKHTIGA U DHEXEEYA QIYAASAHA DAWADA LA QAADANAYO

Baaritaanada daawada loogu qoray?	
Wixii Falcelin xasaasiyadeed daran ah ee ay tahay in dhakhtarka loo sheego*?	
Tilmaamaha gaarka ah ee siinta daawada, oo ay ku jiraan xaaladaha nadaafadda iyo kaydinta?	

Taariikhda iskuulka laga bilaabayo siinta daawada:	Taariikhda dhicidda:

x _____
Saxiixa Dhakhtarka dawada Qoray **Taariikhda**

Magaca qoran ee dhakhtarka dawada qoray: Taleefanka: _____

Ciwaanka dhakhtarka dawada qortay: _____

Haddii faakis ahaan loogu diro dugsiga, waa mas'uuliyadda waalidka in uu hubiyo in la helay

FAKIS LAMBAR: _____

Degmo Dugsiyeedka Magaalada Westerville

Bayaanka Caafimaadka ee Sooridda Cuntada Gaarka ah

Tilmaamaha Waaxda Beeraha ee Maraykanka waxay uga baahan yihiin maamulka cuntada ee dugsiga ee ka qayb qaadanayo Barnaamijka Qadada Dugsiga Qaranka in ay u sameeyaan maamusid macquul ah oo la siiyo ardayda naafada ah, iyadoo loo eegayo xaaladaha gaarka ah, marka baahida lagu caddeeyo bayaan caafimaad oo qoran.

Sharciga Waxka bedelka 2008 ee Muwaadiniinta Maraykanka ee Naafada ah (ADA, Americans with Disabilities) (Sharciga Dadweynaha 110-325, 42 U.S.C. 12101) ayaa cusboonaysiiyay qeexida naafada si ay ugu daraan "qof kasta oo qaba naafo jireed ama maskaxeed oo si xad dhaaf ah u xaddidaysa hal ama wax ka badan hawlo nololeedka muhiimka ah ee shakhsiyeed", oo ay ku jiraan hawlaha mugga leh ee jireed sida hawl nololeed mug leh.

Marka loo eego USDA, maamulka cuntada dugsiga loogama baahna inay buuxiyaan codsiyada cuntada gaarka ah ee ku salaysan dookhyada cuntada ee aan loo tixgelin xaalado caafimaad ama naafo, oo ay ku jiraan doorashooyinka qaab nololeedka shakhsiyeed (sida dadka khudaarka kaliya cuno, cunidda khudrad kali ah, cunidda cunto dabiici ah kaliya) ama ikhtiyaarada cuntooyinka diinta la xariira.

Foomkan waa in uu buuxiyaa takhtar, kaaliye takhtar, ama kalkaaliye caafimaad oo shati dawlad-goboleed haysta. Cusboonaysiinta foomkan ayaa loo baahan yahay kaliya marka baahiyaha ka qaybqaataha ay isbedelaan.

Macluumaadka ka qaybqaataha

Magaca Ka qeybqaataha:_____Taariikhda Maanta: _____
Magaca Dugsiga La Dhigtay/Fasalka:_____Taariikhda Dhalashada: _____
Magaca Waalidka/Mas'uulka:_____
Lambarka Taleefanka Guriga:_____Lambarka Taleefanka Shaqada: _____

Macluumaadka Loo Baahan Yahay: Maamuusidda Cuntada

1. Cuntada xasaasiyadda kugu dhaliso ama cuntada la iska ilaalinayo-goobo geli dhammaan kuwa khuseeya:
Caano subag-laws geedaha lawska ukumaha kalluunka kallunka sheelfiish qamadi digirta guluteen sisin cuntooyin kale____

2. Sharaxaad kooban oo ku saabsan sida soo-cunista cuntadani u saamayso ka-qaybgalaha:
Neefsiga _____
Shaqada muhiimka ah ee jireed (habdhiska difaaca, mindhicirka, dheefshiidka, iwm.) _____
Wax kale, qeex:_____

3. Ardaygu ma cuni karaa cuntooyin uu ku jiro cuntada uu xasaasiyadda ku yahay?_____haa_____maya
(Tusaale: ukunta la shillay waa inaan la siinin laakiin malawaxa/bankeega ukunta lagu sameeyay waa la oggol yahay)

Fiiro gaar ah:

4. WAAJIB AH: Cuntada lagu badali karo (FIIRO GAAR AH: WCS ma qadarin karto dukumeentigan ilaa in BEDELLO GAAR AH hoos lagu taxo mooyaane, ama dhakhtarku uu ardayga u gudbiyo cunto yaqaan diiwaangashan kaas oo tilmaamo ka bixiya liiska dookhyada cuntada.)

Waxaan xaqiijinayaa in ardayga kor lagu xusay uu u baahan yahay wax ka laga beddello cuntadiisa oo loogu beddello cunto kale sababo la xariira xaalad naafonimo ama xaalad caafimaad owgood.

Saxiixa Bixiyaha Caafimaadka Taariikhda Taleefanka

Waxaan u fasaxay Adeegga Cunnada WCS inay samayso beddelkan cuntada ee caafimaad ahaan loo baahan yahay.

Saxiixa Waalidka/Masuulka Taariikhda

Iyadoo la raacayo sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo siyaadaha iyo qawaaniinta xuquuqaha madiga ah ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), USDA-da, wakaaladaheeda, xafiisyadeeda iyo shaqaalaheeda, iyo machadyada ka qayb qaadanaya ama maamulaya barnaamijyada USDAwaa ka mamnuuc inay sameeyaan takoor ku salaysan isirka, midabka, asalka qaran, **jinsiga**, diinta caqiidada, naafonimada, da'da, aaminsanaanta siyaasadeed, amaaargoosiga ama aarsiga ku salasyan hawlaha rayidka ee hore eebarnaamij kasta ama hawlo ay qabatay ama maalgalisay USDA. Dadka qabo naafonimada ee u baahan qaab kale **ee** isgaarsiin ee macluumaadka barnaamijka (tusaale ahaan Indhoolaha, Farta waawayn, cajalado-maqal ah, Luuqadda Dhagoolaha ee Maraykanka, iwm.), waa inay la xiriiraan Wakaaladda (gobolka ama dawlad deegaanka hoose) ee ah halka ay ka dalbadeen dheefaha. Shakhsiyaadka dagoolaha ah ay ku, adag tahaymaqalka ama naafo ka ahhadalka waxay la xiriiri karaan USDA iyagoo u marayo Adeegga Gaarsiinta Faderaalka ee lambarka (800**) 877-8339**. Intaa waxaa dheer, macluumaadka barnaamijka ayaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn luuqadda Ingiriiska. Si aadu gudbiso cabasho barnaamij ee ahtakoorid, buuxi Foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA, (AD-3027) ee looga heli karo si onlayn ah barta: http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, iyo goob kasta ee xafiiska USDA ah, ama u qor warqad aad u dirayso cinwaanka USDA oo ku qor gudaha warqadda dhammaan wixi macluumaad ahee lagaaga codsaday gudaha foomka. Si aad u codsato nuqulkamid ah foomka cabashada, **wac (**866) 632-9992. U gudbi foomkaaga aad dhamaystirtay ama warqada aad u dirayso boostada USDA: U.S. Waaxda Beeraha Xafiiska KaaliyahaXoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga ah

1400 Independence Avenue, SWWashington, D.C. 20250-9410; fakis: (202) 690-7442; ama iimayl: program.intake@usda.gov. Hay'addan waxay bixisaafursado loo siman yahay.